


DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMALIYA



ولاية بونت لاند الصومالية

FAAFINTA

الجريدة الرسمية RASMIGA

DAWLAD A PUNTLAND EE SOOMALIA

لولاية ارض بونت الصومال

Sanadka 37-aad. Garowe 15. 12.2017

Lam.12.

Faafinta bil walba soo baxda جريدة الشهريّة

Oaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yarwaa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinaya xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

TUSMADA

Qaybta Koowaad

Ansixinta khidmadda ujuuroyinka nootaayo-leyda puntland.

Qaybtalabaad

Xeer

Waxba ma leh

Qeybta Saddexaad\

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

Waxba ma leh

Nedcaaya

Xeer LR .8. ee 15/12/2017, kuna saabsan ansixinta khidmaddaujuuroyinka-leyda puntland.



Dawladda Puntland ee Somalia

Puntland State of Somalia

Xeerka Lr.8. ee16/12/2017, kuna saabsari ansixinta khidmadda ujuurooyinka nootaaya-leyda puntland,

Madaxweynuhu,

Markuu árkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPLS/105/2017 Garowe, Jimce. Date: 30/11/2017;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda khidmadani u leeyahay Dawladda Puntland.

Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

Qodobka 1-aad


Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen khidmadda ujuurooyinka nootaaya-leyda Puntland.

Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaan Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqanka Guud ee DPLS.

Qodobka 3-aad

Dhaqan galka Xeerkani wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland, cid kastana ay waajib ku tahay inay dhawrto, kuna dhaqanto.


Prof Cabdiweli Maxamad Cali Gaas.
Madaxweynaha Dawladda Puntland.



DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

GOLAHADA WAKIILADA



ولاية بونت لاد الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

Ref:-XGGW/DPL/ 105 / 2017

Garoowe, Khamiis

Date:- 30/11 /2017

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeeddo:- Ansixinta Khidmada Ujuuroyinka Nootaayo-leyda Puntland.

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-

MARKUU ARKAY: Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa 64-aad

MARKUU ARKAY: Soo gudbinta Madaxweyne ku xigeenka

Ref: MWK/DPS/478/2017 ee Nov-11,2016 kuna
saabsan soo gudbin Ansixin Xeer

MARKUU TIXELIYEH: Baahida loo qabo Ansixinta Khidmada Ujuuroyinka
Nootaayo-leyda Puntland.

MARKUU ARKAY: Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey
kalfadhigii 40-aad fadhigii 11-aad ee 13/11/2017
Khidmada Ujuuroyinka Nootaayo-leyda Puntland.


Wuxuu Guddoomiyey:


Ansixinta Khidmada Ujuuroyinka Nootaayo-leyda Puntland.

Allaa Mahad Leh

Md. Axmed Cali Xaashi

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.





(Xafiiska Agaasimaha Guud ee Cashuuraha Berriga)

Ref:AG/CB/WM/106/2016

Date:- October 10, 2016

UJEEDDO: Ansixin Ujuuradda Nootaayooyinka

Mudanayaal waxaan halkaan idinku soo Gudbinayaa Qaabka ay noqonayso Ujuuradda Nootaayooyinku ay ka qaadanayaan shaqooyinka ay qabanayaan waana sidan :-

Qoraaladda Ku saabsan

LR.	SHAQADA	UJUURADA
B)	Wakaalad Guud	\$ 20
T)	Wakaalad Khaas ah	\$ 12
J)	Qoraal ku saabsan dhigaal documents	\$ 10
X)	Qoraal ku saabsan dhigaal dardaaran qarsoodi ah	\$ 15
Kh)	Qoraal ku saabsan dhigaal dardaaran, marka dardaaranka la dhigayo uu yahay mid uu dardaarmuhu gacantiisa ku qoray.	\$ 7

1. Qoraalada iyo heshiisyada ku saabsan, **la wareegid Hanti-maguurto**, qiimaha hantida heshiisyada shirkadeed oo ceyn kasta ah, wada la haansho hantiyeed, hantida lagu shirkobayo ama la wada yeelanayo;

Isku darid (qiimaha guud iyo keydka shirkadaha la isku darayo), hadii shirkadaha la isku darayo ay midi midkale la midoobayso, hantida iyo keyd guud ee shirkad midkale lagu darayo,

Qoraalada shirkarka shirkadaha ee ku saabsan hanti kordhin ama soo saarid qiraalo deyn shirkadeed, qiimaha hantidii hore lagu kordhinayo ama qiimaha guud ee qoraalada ku saabsan hanti kala qeybsasho, qiimaha guud ee hantida la qeybsanayo;

Qoraalada ku saabsan xuquuqda hanti is dhaafin ama isku bedelid, qoraalada ku saabsan dhisid xuquuq la xariira intifaac, isticmaalida iyo mididiinimo dhuleed (servitu prediali), Rahan, Alaab isku bedelid (permute);

Xaraash Maxkamadeed, intifaacsii, iyo qoraalada kale ee ku saabsan xuquuqda ee la haanshada (diritti possessori) ama Damaanad, waxaa laga qaadayaa ujuuradaha soo socda:-

QIIMAH	UJUURADA NOOTAAYADA
Ilaa	\$ 10,000
\$ 10,001 -	\$ 25,000
\$25,001 -	\$ 50,000
\$50,001 -	\$ 100,000
\$100,001 -	\$ 500,000
\$500,001 -	\$ 1,000,000
Iyo wixii ka badan	